

Miisaaniyda Sanadaka 2005

Ali Gulaid — San Jose, CA — 20 January, 2005

Dhaqaala xumida iyo gaajada Afrika ka taagan waxa ugu wacan maamul xumu, musuq, qaynuun xumo iyo dagaal joogta ah. Haddaad miisaaniyada 2005 ee Somaliland aynu metal u soo qaadano intuba waay ka muuqdaan (maamul xumu, musuq, sharci daro iyo qaban qaabo dagaal). Miisaaniyada hadaan loo isticmaalin sidii loogu talagalay waa denbi waxa iyana kale oo danbi ah cashuur aan la ansixin in la hirgeliyo. Waxa cad in labadaa denbibaa laga galay ummada marka aad ka tilmaan qaadato miisaaniyadi loogu talagalay dhameystirka shuruucda sannadkii hore (2004) oo aheyd \$79,923 oo lagu edeynaayo in Gudoomiyaha Golaha Wakiilda Qeybe u u isticmaalay si aan qaynuunka waafqsaneyn. Sida uu isaguna wasiirka maaliyado golaha wakiilada ka hore qirtay cashuur aan la ansixin ayuu hirgeleyay. Waxa weliba inta dheer in Wasiirku uu qirtay in kharashka ku qayaxan miisaaniyada (2005) qaarkood laga been fariimaayu.

Haddad u heysatay dawlada Somaliland in ay ku xad gudubta xuquuqol insaanka oo qudha dib isugu noqo. Distoorku ansixinta qawaniinta waxa uu u xil saaray barlamanka oo qudha. Wasiir iska daayoo xataa Madaxweynuhu ma ansixin karo Haddana waxa la ogyahay in siddi wasiirka maaliyado (Cawil) uu ka qirtay baarlamanka in uu casuuraha qaarna kurdhiyay qaar cusubna sameeyay soo ururintoodana hirgeliyay iyada oo aanu baarlamanko ansixin. Taasi waxa ay kuu cadeyneysa in Wasiirka u badhiidhay in uu cashuur aan sharci ku saleeysneyn hirgeliyo isaga oo aan barlamankii waxba isaga tirineyn in uu sida uu doonnana uugu tagrifali karo. Tani waa mid hor leh oo ay tahay in xeer ilaaliyaha guud iyo baarlamanku ay ka hawl galaan.

Nin walba halkii bugtaa isagaay belbeshaa miisaaniyadona haddi aan baahiba baahida ay ka mudantahay aan laga fuudh yeelin amba sidee loogu tala galay loo isticmaalin waa hal bacad lagu lisay. Haddaba miisaaniyada 2005 ee baarlamanku maanta ansixiyay waa mid sii dhid beysa siina baaheneysa baahida dhaqaale ee loogu tala galay in ay khafiifiso. Waa mid aan meel aan baahi jirin loo bedeyay, waa mid lagu badhxay cashuur aan sharci aheyn, waana mid lagu hafraayo agoomaha iyo Naafada, waa mid aan horumarkii wax la sheegi karo aan looga qoondeyn, waa mid Cabdi Xasan Buuni ka yeeshay boqorkii martiqaadka \$7,123, waa mid Madaxweynaha iyo Mw/kuxigeenka ka yeeshay kuwii ugu mushahar badna Madaxda Afrika iyo Europe, waa mid dakhligee dekkedda Berbera, dakhligee Haamaha TOTAL, kii madbacada iyo ili dhaqaali oo kalaba ka dul booday waa mid isku soo wada duuboo himilada Somaliland soof daran habaabinaaya.

Cashuur aan la ansixin oo la hirgeliyaa waa kow. Waxa se caado noqotay in si kastaba ha lagu soo ururiyee aay in badani khasnada dawlada garab marto qaarna loo isticmalo si aan laaqa aheyn. Farsama xumida ceynkas ihi waay ku barra kicisaa. Waxana ka mid ah aan idiin horeyseeyo miisaaniyada Somaliland 2005 oo lagu qiyaasay ila iyo 22 milyan oo dollar (\$1=6,739 S/L) boqolkiiba tobban (10%) iyo jar jar (\$2,260,630) ayaa ku baxa mushaharka Madaxweynaha, Mw/ku-xigeenka iyo Madaxtooyada.

Aan ku sii bal balaadhiyu. Labbiyo toban milyan oo dollar iyo weliba jarjar \$12,120,276 waa xoolo dameer gooya. Xoolaha inta leegi marka laga shidaal qaato labbadii sanno ee u denbeeyay waxa weyaan musharka Madaxweynaha (\$2,931,528), ka MW/kuxigenka(\$872,038) iyo kharashka Madaxtooyada (\$8,316,710) shanta sanno ee aay xukunka heynayaan.

Mushaharka intaa leeg ayo nin mar Hargeysa Mayor ka ahaan jiray madaxda UDUBna ka mid ah oo la yidhaahdo Caawl Elmi Cabdala uu mar uu magaalada Bristol ee ingreeska ka hadlaaya shir UDUB isugu timid kaga dhawaaqay in Madaxweynaha Mushaharka loo gurdhiyu. Cawl la yaab ma laha oo markii uu

Mayorka ahaa mushahar u xadidnaa ma jirin ee hadba inta kacantiiso qaado ayuu rujin jiray

Sannadka maanta ah waxa aad moodaa in ay ka soo dhacday Madaxweynaha iyo MW/kuxigeenka waxa ay ka mushahar badan yihiin Madaxweynaha iyo MW/kuxigeenka Maraykanka oo mushaharkoodu ka la yahay \$400,000 iyo \$186,320 sida awgeed Rayaale waxa uu iska dhimay boqol kiiba labaan (20%) MW/kuxigeenkuna boqolkiiba (5%). Taasina waxa ay mushaharkoodii hoos ugu soo riday sidan \$385,876 iyo \$170,827. Hadduu Rayaale is lahaa hakaa hadho mushahar kaga oo la garab dhigo ka Madaxweynaha Mareykanka waxa uu iloobay in uu weli yahay Madaxweynaha ugu Mushaharka badan qaarada Africa iyo Europe ba.

Dhinac kale haddi aad ka eegto Mushaharka Madaxweynuhu (\$385, 876) waxa uu ka badenyahay miisaaniyada lix wasaaradood oo la isku darro kuwaas oo kala ah a) Xoolaha \$95,656 b) Beeraha \$83,649 c) Ciyaaraha \$58,711 d) Caddalada \$34,994 e) Macdanta iyo Biyaha \$77,469 iyo f) Xidhiidinta Golayaasha \$23,610. Waxa kale oo la odhan karaa waxa ay is leeg yihiin miisaaniyada Golaha Guurtida oo ah \$399,189.

Waxa aad inta ku darsataa Madaxweynuhu Kiru nal iyo biyo toona ma bixiyo. Xataa cashuurta musharka (payrolltax/income tax) askariga kurigeesa ilaaliya laga jarro Madaxweynaha lagama jarro. Waxa inta dheer W/Madaxtooyada oo Madaxweynaha hoos timaada oo uu sida uu doono u isticmaalo miisaaniyadeeda oo ah \$1,703,923. Taa waan u soo noqon ee aan ku horeysiiyo kharashka ku baxa Ilaalinta Qasriga Madaxweynaha oo ah \$276,297 kaas oo ka badan miisaaniyada lix (6) wasaaradood oo la isu geeyay oo kala ah a) Qoyeska \$37,004 b) Ciyaaraha \$58,711 c) Cadaalada \$34,994 d) Qorsheynta \$43,950 iyo e) Macdanta iyo Biyaha \$77,469

Haddaad sida Cawl aaminsantahay Madaxweynaha mushahar ku in uu ku yaryahay waxa aad xisabta ku darsataa miisaaniyada Madaxtooyado oo iyana ah \$1,703,927. Taasi oo ka miisaaniyad badan lix iyo toban (16) wasaradood iyo todoba hay'adood (7) oo la isku daray miisaaniyadood oo kala ah a) Duulista \$218,708 b) Beeraha \$83,649 c) Macdanta iyo biyaha \$77,469 d) Xoolaha \$95,656 e) Reer Miyiga \$98,486 f) Kaluumeysiga \$131,622 g) Cadaalada \$34,994 h) Qorsheynta \$43,950 i) Boostada \$79,673 j) Diinta \$61,449 k) Dalxiiska \$81,266 l) Dib-U-dejinta \$50,559 m) Xidhiidhiska Golayaasha \$25,610 n) Qoyeska \$37,004 o) Ciyaaraha \$58,711 p) Ganacsiga \$129,099 iyo q) Maxkamada Sare \$66,323 r) Xeerilaalinta Guud \$68,733 s) Hay'ada Shaqaalaha \$ 76,714 t) Haantidhowrka Guud \$73,657 u) Miina Saarka \$30,928 v) Qandaraaska \$17,352 x) N.D.C \$36,846

MW/ku-xigeenku qudhidiiso dab yar shidi maayo. Mushaharka MW/ku-xigeenkuna waxa ay ka badantahay miisaaniyada afar wasaaradood oo la isku daray oo kala ah a) Qorsheynta \$43,950 b) Diinta iyo Awqafta \$61,449 c) Horumarinta Qoyeska \$37,004 iyo d) Xidhiidinta Golayaasha \$25,610. MW/kuxigeenku talow ma og yahay in uu mushaharkiisu in ku dhow saddex (3) laab uu ka badan yahay miisaaniyada diinta iyo awqafta iyo in uu saddex laab (3 times) ka badan yahay miisaaniyada Jaamacada Hargeysa, Jamacda Camuud iyo machadka tababarka macalimiinta oo marka la isku darro isku noqonaaya \$44, 520.

Waxa kale oo iyana jira wasaarada badan oo aan loo baahneyn oo ay ka mid yihiin Wasaarada Madaxtooyada, War faafinta, Dalxiiska, Xidhiidhiska Golayaasha, Deb-u-dejinta, Duulista iyo qaar ka laba. Wasarada Dalxiiska oo kuwaa ka mid ah oo loo qoondeeyay miisaaniyad dhan \$81,266 bal aan hoos u eegno. Shantii sannadood ee u danbeeyay miisaaniyada lagu qoray dalxiiska waxa ay dhantahay \$304, 081. Sida uu wasiirka daxiisku sheegeyna shaqali ay leedahay ma jiro. Haddaba waxa la yaab leh in wasarada ninka qudhi horfadhiyo wax dakhli ahna aanu soo gelin ay ka miisaaniyada badantahay miisaaniyada toddoba (7) wasaaradood oo kala ah a) Boostada \$79,673 b) Macdanta iyo biyaha \$77,469 c) Caddaalada \$34,994 d) Maxkamada Sare \$66,323 e) Xeer Ilaaliyaha Guud \$68,733 f) Hay'ada Shaqaalaha \$76,714 g) Hanti

Dhowrka \$73,657. Waxa kale oo ay ka badantahay miisaaniyada laba wasaraddood oo la isku daray oo ka la ah a) Qorsheynta \$43,950 iyo b) Xidhiidinta Golayaasha \$25,610

Waxa sannadkan soo baxay wax been abuur ah oo lagu hafraayo Naafada iyo agoomaha. Naafada iyo Aggoomaha urur kooda sooyal sannadkan missaniyadiisu waxa lagu qoray \$22,318 oo tii sannadkii hore ka yar. Waxa kale oo aynu ka warqabnaa in Aggoomihii markay gaddoodeen wasiirka daakhiligu uu askar u dalbaday kuna yidhi wakhtigii SNMTu wuu dhamaaday ee miisha ka dareera. Aggomihi sidaa loola dagaalamay ayaa hadana lagu magacaabay miisaaniyad ah \$1,469, 695. Waxa se caddaan ah in ay hafar tahay iyo been abuur. Tafaasiishiidona waa sidan a) Raashin \$266,235 b) Stationeryga \$712 c) Shidalka \$4,541 d) Musharka \$1,193,668 e) Habeen dhixida Naafada \$1,484 iyo Naafada \$3,056. Stationery iyo habeen dhixid Aggoomaha loogu tala galay ma jirto ee Sua'shu se waxa ay tahay in xukuumado ay baarlamanka iyo dadkaba soof daran habaabiso ma qawaaniintaay ka mid tahay?

Waxa wasaaraduhu ka simanyihiin miisaaniyad loo qoondeeyay waxa lagu sheegay isticmaalka iyo iibsiga qalabka nalka iyo biyaha oo marka la isu geeyo isku noqonaaya \$142,552. Doshu waxa aad ka mooddaa wax la garawsan karo marka ad se u kuur gasho waxa soo baxaya laba arin labadaba, waa mid eh wasaarad iyo wasiir bixiya biyo iyo nal midna ma jiro, waa mida kale e qalabka biyaha iyo nalka mar uunbaa la iibsadaa ee joogto ma aha. Waxa la ug yahay in wasiirka Maaliyado iyo wasiir hore oo arimaha guud ahaan jiray ay ku dagaalameen kuna xagxagteen shaqaalihi biyaha.

Waxa iyana miisaaniyad gaar ah leh Qareen sabool iyo markhaatiyaasha oo noqotay \$9,972. Fikrado waay fiicantahay hase yeeshe weli lama hayo qarren qudha oo ay dawlado qof sabool ah u qabatay lacagtiina u tirisay

Waxa kale oo iyana miisaaniyada ku qayaxan Kharash dhan \$64,020 oo loogu tala galay Hawlaha magaha iyo xaqsiinta. Haddaba waxa muranku ka taaganyahay ma maxkamada xukunta mise wasiirkaa ku doonana xaq siiya ku doonana daadafiya?

Waxa kale oo jira wax dawladu ay ku sheegto Kharashka yaryar oo isku noqonaaya \$42,570. Kharashkaasi waxa uu ka badanyahay miisaaniyada saadex (3) wasaaraddood oo ka la ah a) Horumarinta Qoyska \$37,004 b) Cadaalada \$34,994 iyo c) Xidhiidinta Golayaasha \$25,610. Xoolaha intaa leeg in lagu sheego Kharashka yar yar oo aan xisaab laheyn waa budh cadnimo.

Waxa kale oo iyana ah wax lala yaabo a) Kalmada Rugta Ganacsiga \$4,748 b) Martiqaadka \$66,256 c) Tababarka Warshedleyda \$1,971 iyo d) Kharashka garsooka ciidamada \$9,438. Ugu horeeyn Rugta Ganacsiga dadka ay u adeegto oo ah ganacsatada ayaay tahay in ay xilkiida qaadan dawlada ka madax banaanaadan. Marlabaadka ganacsatada awoodi kartay maal gelinta warshadaha sidiibaay dawladu ugu kharash gareysaa tababar? Tababarka aay se dawlada ganacsatada siineyso maxaay tuur tiida ugu toosin weeyday. Lacagtan Martiqaadka ku baxaaysaa ee wasiir walba u qoran waa xad dhaaf intiida badana waa la iskaga tagrifalaa maana jiraan dareeq (policy) loo raaci karo oo u dijisan. Ta garsoorka ciidamada iyana wa mid kale oo lagu qoslo.

Fidinta maamulka iyo hawlaha Bariga sannadkii hore waxa loo qoondeeyay \$95,238 sanadkana inka badan toban (10) laab ayo kur u kacay \$1,072,860. Markaa waxa aynu filnaa waa in Burco iyo Borama shilnka S/L lagaadh siiyo iyo Sool iyo Sanaag oo la soo hooyo sanadkan.

Waxa dawladu leedahay inka badan toban (10) wasiira dawle. In taas oo Wasiira dawle mid qudha ayaa leh miisaaniyad u gaar ah. Kaasina was wasiira dawlaha wasaarada dibeda (foreign) waxana loo qoondeeyay

\$10,387.

Haddaynu u soo noqono waxbarashada \$1,062,928 iyo caafimaadka \$650,890 marka la isku darro waxa ay u dhigmaan miisaaniyada Madaxtooyada \$1,703,927.

Waxa iyana layaab leh miisaaniyada loo qoondeeyay ciidamada Asluubta oo ku dhow hal milion oo dollar (\$993,478) taas oo ka badan miisaaniyada wasaarada caafimaadka (\$650,890) laban laab in ku dhow. Waxaana la u dhan karaa waxa ay is leegyin miisaaniyada Waxbarashada \$1,062,928. Waxa kale oo ay ka badantahay miisaaniyada shan iyo toban (15) wasaaradood oo la isku daray kuwaas oo kala ah a) Beeraha \$83,649 b) Caddalada \$34,994 c) Qorsheynta \$ 43,950 d) Macdanta iyo Biyaha \$77,469 e) Reer Miyiga \$98,486 f) Ciyaaraha \$58,711 g) Dib-U-dejinta \$50,559 h) X. Golayaasha \$25,610 i) Maxkamada Sare \$66,323 j) Xeerilaalinta Guud \$68,733 k)Hantidhowrka Guud \$73,657 l) Miino Saarka iyo \$30,928 m) Hay'ada Shaqaalaha \$76,714

Waxa iyo wax ka daran ayay hantidii yareyd ee dumarka agoomaha kursanaaya ee koobka shaaha bacadka ku iibiya laga soo guraayo lagu khasaariyaa. Waxa an idiin horeysiiyay wasiirka xidhiidhinta labada goli (Xasan Cabdi Buuni) in miisaaniyadiisa martiqaadko dhan tahay \$7,123. Marka aad iigto miisaaniyada wasarada oo dhan \$25,610 martiqaadko waxa uu noqonayaa saddex daloollo dalool.

Waxa iyana la yaab leh in miisaaniyada kala badh (50%) ay ku baxeysa ciidan iyo wixii xidhiidiya. Marka aad taa ku darto 10% ka ku baxa Madaxweynaha iyo MW/ku-xigeenka waxa miisaaniyada ka soo hadhay 40% oo qudha oo iyagona ku baxaya dalxiis iyo martiqaad.

Walee wadanka sidaa wax u luminayaa meel ma gaadho!

Ali Gulaid, San Jose , CA

Shaxda Koobaad (1)		
Soo Kubida guud EE Missaniyadda Sannaddada - 2005		
Description	(\$1 = 6,739 S/L Shilling)	
	S/L Shilling	US\$Dollar
Qasriga Madaxtooyada	2,600,419,200	385,876
Madaxweyne Ku-xigeenka	1,151,200,000	170,827
W/Madaxtooyada	11,482,761,458	1,703,927
Golaha Guurtida	2,690,134,800	399,189
Golaha Wakiilada	2,849,863,200	422,891
Maxkamada Sare	446,948,800	66,323
Xeer Ilaaalinta Guud ee Qaranka	463,194,400	68,733
Hay'ada Shaqaalaha	516,977,600	76,714
Hanti-dhowrka Guud	496,375,200	73,657
Guddida Qandarasyada	116,932,000	17,352
Hay'da Nerad	186,780,000	27,716
W/Arimaha Dibada	1,870,580,000	277,575
Caddalada	235,824,000	34,994
Ciidanka Asluubta	6,290,707,200	933,478
Maxkamada Hoose	1,956,383,200	290,308
Arrimaha Guddaha	7,253,005,000	1,076,273

Ciidanka Booliska	15,499,411,200	2,299,957
Wafaafinta	1,120,164,000	166,221
Gaashandige	8,198,449,200	1,216,568
Ciidanka Qaranka	39,464,354,920	5,856,114
Qorshaynta	296,182,400	43,950
Maaliyada	14,795,601,571	2,195,519
Ganacsiga & Warshadaha	869,997,600	129,099
Macdanta iyo Biyaha	522,060,400	77,469
Kaluumiysikga	887,002,400	131,622
Beeraha	563,710,400	83,649
Xannanada Xoolaha	644,624,000	95,656
Boosaha & Isgaagsiinta	536,919,360	79,673
Waxbarashada	7,163,075,000	1,062,928
Caafimaadka	4,386,348,000	650,890
Diinta iyo awqaafta	414,108,000	61,449
Dalxiiska	547,649,600	81,266
Hawlaha Guud	3,229,372,800	479,207
Duulista & Gaadidka Cirta	1,473,875,200	218,708
Horumarinta reer Miyiga	663,696,800	98,486
Dib-u-dejinta	340,717,600	50,559
Hay'da N.D.C	248,302,600	36,846
Hay'ada Miina Saarka	208,425,600	30,928
Xidhiidka Golayaasha	172,588,000	25,610
Dhallinyarard & Ciyaaraha	395,652,000	58,711
Guddiga Doorashooyinka	4,752,469,000	705,219
Horumarinta Qoyska	249,368,000	37,004
Total	148,252,211,709	21,999,141

Shaxda Labaad (2)

Kharashka Naafada iyo Aggomaha

Faahfahin	US\$ Dollar
Raashinka Naafada, Aggomaha H/gabka	266,235.00
Stashineriga (stationery) Naafada	712.00
Shidaalka Naafada	4,541.00
Mushaharka Naafada & Agoomaha	1,193,668.00
Habeen Dhixida Naafada	1,484.00
Naafada	3,056.00
	\$ 1,469,696.00

Shaxda Saddexaad (3)

Kharashka Raashinka

Raashinka Ciidanka	1,367,714.00
Raashinka Aggomaha	3,561.00
Raashinka Cisbitaaalka	31,162.00
Raashinka Warshada	4,553.00
Raashinka Maxaabista	216,649.00

Rashinka Naafada,Aggomaha	266,235.00
Rashinka shanta Maxbuus	3,039.00
Kabka Rashinka Ciidamada	116,694.00
	\$ 2,009,607.00

Shaxda Afraad (4)

Miisaaniyada Hoostimaada Wasiirka Daakhiliga

Ciidanka Asluubta	933,477.85
W/Arimaha Gudaha	1,076,273.19
Ciidanka Booliska	2,299,957.14
	\$ 4,309,708.18

Shaxda shannad (5)

Kharashka Ciidan iyo sirdoon

W/Gaashaandhiga	1,216,568.00
Ciidanka Qaranka	5,856,114.00
Ciidanka Booliska	2,299,957.14
Ciidanka Asluubta	933,477.85
W/Gudaha	1,076,273.19
	\$ 11,382,390.18